



Su'aalaha badanaa ay iswaydiinayaan qoysasku

Waa maxay Sahanka Iskuulada Guuleystay Sanad-Dugsiyeedka 2019-20 ee Dugsiyada Dadweynaha Portland?

Sahanka Iskuulada Guuleystay wuxuu qoysaska siinayaan fursad ay kula wadaagaan sida uu xaalka iskuulka ardaydoodu yahay. Maamulka Dugsiyada Dadweynaha Portland, maamulayaasha iyo macallimiintu waxa ay iguna ka helaan daah-furnaan, macluumaad dhammeystiran oo ku saabsan waayo-aragnimada dhammaan qoysaska iskuuladeenu .

Waa ayo cida sahanka qaadanaysaa?

Sahanka waxa qaadanaya ardayda fasalada 4aad,5aad,6aad,7aad ilaa fasalka 10naad iyaga oo lagu weydiinayo waayo-aragnimadooda fasaladooda, iskuulada iyo waliba aragtida waalidiinta ee ku wajahan iskuulada ay caruurtoodu wax ka barato.

Waa ayo cida sahankani qaadaysaa?

Sannadka-dugsiyeedka 2019-20, Dugsiyada Dadweynaha Portland oo iskaashi la sameynaya Panorama Education waxa ay ururinaya xogta ardayda iyo qoysaska taasi oo naga caawin doonta sidii aanu kor ugu qaadi lahayn waayo-aragnimada dhamman ardayda dugsiyada degmada wax ka barata. Panorama waxa ay caawin doontaa Dugsiyada Dadweynaha Portland inay si degdeg ah u soo gaadhsiiyaan natijjooyinka, iyaga oo siinaya shaqaalaha dugsiyada degmada tababaro sidii ay u isticmaali lahaayeen natijjooyinkaasi in lagu horumariyo. Panorama waxa ay sidoo kale addeeg siin doonaan dugsiyada degmada ee wadanka oo dhan, sidaas awgeed waxa aynu fursad u heli doonaa in aan isbarbar dhigno natijjooyinkeena iyo kuwa kale ee ka soo baxa degmooyinka kale. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Panorama, waxaad booqataa shabakadani: <https://www.panoramaed.com..>

Maxaa ka mid ah mawduucyada lagu soo qaadanayo sahankani?

Sahankani waxa lagaga hadli doonaa mowduucyo ku saabsan dareenka lahaanshaha, amniga dugsiga, jawiga dugsiga, carqaladaha hortaagan ka qeybqaadashada qoyska, iyo sidoo kale sida ardaydu ay uga fikirayaan una dareemayaan kala duwanaanshaha, sinnaanta, iyo inay ka mid yihiin ardayda dugsiga.

Goorma ayaa sahanka la qaadanayaa?

Taariikhda sahankan la bilaabayaa waxaa loo suntay bisha Janaayo 27keeda. Waxa sidoo kale loo mudoooyey jadwalka ardaydu qaadanayso inuu furan yahay ilaa bisha Febraayo 14keeda, iyada oo qoysasku sahankan iyagana uu u furan yahay ilaa bisha Febraayo 28keeda.

Waa maxay sababta loo doortay kaliya inay sahanka qaataan fasalada, 5aad, 7aad, 8aad, 9aad, 10naad ?

Sahaminta lagu sameynayo heerka fasaladani waxa ay naga caawin doontaa sidii aan u fa